**Mucaarad** ( *trans.- conj. 1* ) To oppose something. Waan mucaaradayaa siyaasadaha xisbiga taliya— *I am opposing the ruling party's policies.* Mucaaradka (n)= opposition.

Mudaaharaad ( *intr.- conj. 1* ) To demonstrate. Dad badan ayaa mudaaharaadaya hadda— *Many people are demonstrating now.* Mucaaradis (n)

Mudaaharaadka(n)=demonstration. SMA: bannaan-bax ( *conj. 1* ).

**Muddee** ( *trans.- conj. 2b* ) To set or specify a time or a date (e.g. of a meeting). Waqtiga shirka ayaa la muddeeyay— *A date for the meeting was set.* Muddayn (n). SMA: waqtiyee ( *conj. 2b, arb.* ).

**Musallaf** ( *intr.- conj. 1* ) To become bankrupt. Ganacsaduhu wuu musallafay— *The businessman has become bankrupt.* Musallafid (n). SMA: kac and lacag-beel ( both *conj. 1* ).

**Muxaadaree** (*intr. - conj. 2b*) To give a lecture. Wuu muxaadarayn doonaa berri— *He will give a lecture tomorrow*. Muxaadarayn (n). Muxaadaro/muxaadarada ( a lecture).

**Nacaladee** (*trans.- conj. 2b*) To say to someone “God’s wrath is on you”— used only in negative imperatives. Ha nacaladaynin qof!— *Don’t say to anyone “ God’s wrath is on you”!* Variant spelling: lacanadee. Nacaladayn (n).

**Nadiifi** ( *trans.- conj. 2a*) To make something clean. Gurigayga ayaan nadiifinayaa— *I am cleaning my house*. Nadiifin (n). SMA: huf ( *conj.1*)

**Najax** (*intr.- conj. 1*) 1. To succeed. Waan najaxay— *I have succeeded*. (*Used with ku (in)*: Cali wuxuu ku najaxay imtixaanka xisaabta – *Cali has succeeded in the mathematics examination*. Naxajaxis(n). SMA: Guulayso ( *conj.3b*).

**Naqdi** (*trans.- conj. 2a*) To criticise something (e.g.- a work of art). Qoraagu wuxuu naqdiyay ruwaayadda cusub— *The writer has criticised the new play*. Naqdin (n).

**Nasiibso** (*trans.- conj. 3a*) To try one’s luck with something—Used with *ku*. Miyaad ku nasiibsatay bakhtiyaanasiibka?— *Have you tried you luck with the lottery?* Nasiibsasho (n).

**Nasteexee** ( *intr.- conj. 2b*) To give someone a bit of advice— used with *u*. Wuu ii nasteexeyay— *He has given me a bit of advice*. Nasteexayn (n). SMA: waani ( *conj. 2a— used without a preposition for subject*).

**Nidaami** (*trans. - conj. 2a* ) To put something in order. Guriga ayay nidaaminaysaa - *She is putting the house in order*. Nidaamin (n). SMA: habee (*conj. 2b*).

**Nijaasee** ( *trans.- conj. 2b*) To make clothes or places dirty and unsuitable for using for prayers. Waa in aan la nijaasaynin dharka lagu tukado— *Prayer clothes should not be made dirty and unsuitable for prayer*. Nijaasayn (n).

**Nikaaxso** ( *trans.- conj. 3a*) To exchange marital vows to become a couple; to marry — sometimes used with *is* ( each other). Barre wuu nikaaxsan doonaa Sahra— *Barre will marry Sahra*. Nikaaxsasho (n).

**Nisbee** ( *trans.-conj. 2b*) To attribute to someone. Wasiirka ayaa loo nisbeeyay xigashada— *The quote was attributed to the minister*. Nisbayn (n).

**Niyad-jab** (*intr.- conj. 1; p.s.* ) To become disappointed—used in the past tense to convey simple present tense in English . Miyaad niyad-jabtay?— *Are disappointed?* Niyad-jabka (n). SMA: qalbi-jab ( *conj. 1, p.s.*)

**Niyad-jabi** ( *trans.- conj. 2a; p.s.*) To disappoint. Ha i niyad-jebinin!—*Don’t disappoint me*. Variant spelling: niyad-jebi. Niyad-jebin (n). SMA: qalbi-jabi/qalbi-jebi ( *conj. 2a arb. p.s.*).

**Niyayso** ( *trans.- conj. 3b*) To have something in your mind in the hope of doing or acquiring it; to intend; — used in past tense but can convey either simple present or simple past in English. Waxaan niyaystay inaan sanadka dambe Soomaaliya tago— *I intend to visit Somalia next year*. Niyaysasho (n).



**Nusqaami** ( *trans.- conj. 1* ) To reduce something. Misaaniyadda gaashaandhigga oo la nusqaamin doono—*The defence budget will be reduced.* SMA: dhin ( *conj. 1* ) and yaree ( *conj. 2b* ). Nusqaamin(n).

**Oofi** ( *trans.- conj. 2a* ) To keep a promise. Waan oofin doonaa ballanta - *I will keep the promise.* Oofin (n).

**Qaabbil** ( *trans.- conj. 1* ) To meet—*used without a preposition* . Miyaad qaabbishay Darmaan?— *Have you met Darmaan?* Qaabbilis (n). SMA: la kulan ( *conj. 1* ).

**Qaaddac** ( *trans.- conj. 1* ) To boycott. Xisbiga talada haya wuu qaaddici doonaa kulanka wada tashiga ah — *The ruling party will boycott the consultative meeting.* Variant spelling: qaaddic. Qaaddicis (n).

**Qaalib-noqo** ( *trans.- conj. 3b; p.s.* ) (Of emotions or desires) to overwhelm. Miyuu xanaaq kaa qaalib-noqon karaa?—*Could anger overwhelm you?* Qaalib-noqosho (n). SMA: ka adkow ( *conj. 3a* ).

**Qaaliyee** ( *trans.- conj. 2b* ) To make something more expensive. libiyuhu wuu qaaliyeeyay dharka cusub—*The seller has made the new clothes more expensive.* Qaaliyayn (n).

**Qabbee** ( *trans.- conj. 2a* ) To hide. Yaa qabbeeyay furahayga?—*Who has hidden my key?* Qabbayn (n). SMA: qari ( *conj. 2a* ).

**Qabyaaladee** ( *intr.- conj. 2b; l.c.* ) To favour or support a person over another because of shared clan identity. Wasiirku miyuu qabyaaladeeyaa?— *Does the minister favour some people over another because of shared clan identity?* When used with *u* as in *u qabyaaladee* ( to unfairly help someone you are related to), the verb becomes transitive. Qabyaaladayn (n). SMA: u eexo ( *trans.- conj. 3b* ).

**Qaddar** ( *intr.- conj. 1* ) ( Of God ) to predestine. Eebbe ayaa qaddaray inaan tago Soomaaliya sanadkii hore— *God predestined me to go to Somalia last year.* Qaddarka (n): fate.

**Qadee** ( *intr.- conj. 2b* ) To have a lunch. Goorma ayaad qadaysaa?—*When do you have lunch?* Waxaan ka qadeeyay maqaayad cusub shalay - *I had lunch at a new restaurant yesterday.* Qadayn (n).

**Qalbi-jabi** ( *trans.- conj. 2a; p.s.* ) To discourage. Ma fiicna in la qalbi-jebiyo arday— *It is not good to discourage a student.* Variant spelling: qalbi-jebi. Qalbi-jebin(n) ).

**Qallib** ( *trans.- conj. 1* ) To overturn. Dabayshu way qallibtay gaadhiga—*The wind has overturned the car.* Qallibis (n). SMA: geddi ( *conj. 1* ).

**Qalliban** ( *intr.- conj. 1, pass. v.* ) To get overturned. Gaadhigu wuu qallibmi gaadhay— *The car was almost overturned.* Qallibanka (n). SMA: gaddoon and rogan ( both *conj. 1* ).

**Qamaar** ( *intr.-conj. 1* ) To gamble. Maan jecli inaan qamaaro— *I don't like to gamble.* Qamaaris (n).

**Qaraabayso** ( *trans.- conj. 3b* ) To keep in touch with someone you are related to. Waan qaraabaystaa Jimcaale— *I keep in touch with Jimcaale because we are related.* Qaraabaysasho (n). SMA: xidhiidhi ( *conj. 2a* ).

**Qaraabo-kiil** ( *trans.- conj. 1; p.s.* ) To favour someone you are related to or have common interests with . Ma fiicna in loo qaraabo-kiilo dadka kula shaqeeya— *It is*

*not good to favour a staff member over another staff member.* Qaraabo-kiilis (n).

**Qaraabo-kiilka** (nepotism) SMA: u eexo (conj. 3b)

**Qaraqan** (intr.- conj. 1; pass. v.) To drown. Qaxooti badan baa ku qaraqmay badda u dhexeysa Yemen iyo Soomaaliya— *Many refugees have drowned in the sea between Yemen and Somalia.* Variant spelling: garaqan. Qaraqmis (n).

**Qaxwee** (intr.- conj. 2b) To have a coffee. Halkee baad ka qaxwaysaa?— *Where do you have coffee?* Qaxwayn (n).

**Qayiran** (intr.- conj. 1 pass. v.) (Of faces) to change or become slightly disfigured. Wajigiisu wuu qayirmay— *His face has become slightly disfigured.* Variant spelling: Qayidhan. Qayirmis (n).

**Qiddadee** (trans.- conj. 2b) To plan; to scheme. Waxaan qiddadaynayaa mashruuca waxbarashada— *I am planning the education project.* Qiddadayn (n). SMA: qorshee (trans.- conj. 2b).

**Qiimee** (trans.- conj. 2b) To guess the price of something; to value. Yaa qiimayn kara gurigan?— *Who can value this house?* Qiimayn. (n).

**Qiime-jab** (intr.- conj. 1; p.s.) (Of prices) to become deflated. Baabuurtu way qiime-jabeen— *The price of cars have fallen.* 2. (Of reputations) to be damaged. Siyaasigu wuu qiime-jabay— *The politician has had his reputation damaged.* Qiime-jabis (n). SMA: qiime-dhac (conj. 1 arb.; p.s.).

**Qisaas** (trans.- conj. 1) To execute someone in line with the Islamic law. Dilaagii waa la qisaasay— *The killer has been executed.* Qisaasid (n).

**Qish** (trans.- conj. 1) (Of examination) to cheat. Ma fiicna in la qisho imtixaanka. *It is not good to cheat on an examination.* Qishka (n).

**Qiyaas** (trans.- conj. 1) To estimate. Miyaad qiyaasi kartaa masaafada u dhexeysa Muqdisho iyo Kismaayo?— *Can you estimate the distance between Mogadishu and Kismayo?* Qiyaasid (n).

**Quwad-sheego** (trans.- conj. 3b; p.s.) To overpower someone— used with u. Tuugga muu ku guulaysanin inuu u quwad-sheegto ninka— *The thief has not succeeded to overpower the man.* Quwad-sheegasho (n). SMA: awood-sheego (conj. 3b).

**Quweyso** (intr.- conj. 3b) To gain strength; to become strong. Wiilku wuu quwaysanayaa haddii uu sii wado jimicsiga— *The boy will become strong if he keeps exercising.* Quwaysasho (n). SMA: xoogayso (conj. 3b).

**Raajacso** (trans.- conj. 3a) (Of a husband) to marry woman again after divorce. Miyuu ninku raajacsaday naagta?— *Has the man remarried the woman after divorcing her?* Raajacsasha/ raajacsiga. (n)

**Raalli-geli** (trans.- conj 2a; p.s.) To apologise to someone. Miyuu raalli-geliyay walaashiis?— *Has he apologised to his sister?* Raalli-gelin (n).

**Raaxayso** (intr.-conj. 2b) To have a comfortable time e.g. by taking a rest; to chill out. Waan raaxaystaa Sabti kasta— *Every Saturday I take a rest and have comfortable time.* Raaxaysasho (n).

**Rajee** (*intr.- conj. 2b*) To hope. Waxaan rajaynayaa in aan ku gudbo imtixaanka xisaabta - *I am hoping to pass the mathematics examination. (Used with u (for))*: Waxaan kuu rajaynayaa caafimaad wanaagsan - *I wish you good health.* Rajayn (n).

**Rajo-geli** ( *trans.-conj.2a; p.s.*) To give someone a hope or a reason to feel optimistic. Miyuu ku rajo-geliyay?— *Has he made you feel optimistic?* Rajo-gelin(n).

**Rakib** (*trans.- conj. 1*) To install. Miyaa la rakibayaa mishiinka cusub?— *Will the new machine be installed?* Rakibis (n).

**Raqiisi** (*trans.- conj. 2a*) To make something cheaper. libiyuhu wuu raqiisiyay dharka cusub—*The seller has made the new clothes cheaper.* Raqiisin (n). SMA: jabi/jebi (*conj. 2a*).

**Rasaasee** (*trans.- conj. 2b*) To open fire on someone. Boolisku muu rasaaseeyo bannaan-baxayaasha - *The police does not open fire on demonstrators.* Rasaasayn (n). SMA: xabbadee ( *conj.2b*).

**Raxmo** ( *trans.- conj. 3b*) ( of God) to have mercy for/be kind to someone . Eebbe wuu u raxmadaa dadka— *God is kind to people.* Raxmadda(n). SMA: naxariiso ( *conj.3b*)

**Rukuuc** (*trans.- conj. 1*) To bow in prayer . Waan rukuucay markii aan tukanayay— *I bowed when I was praying.* Rukuucis (n).

**Saa'id** (*intr.- conj. 1*) To increase. Qiimaha shidaalku wuu saa'idi doonaa - *The fuel price will increase.* 2. (Of situations) to be new. (*Used with soo*): Maxaa soo saa'iday - *What is new?* SMA: Maxaa cusub/Maxaa soo kordhay? Laba shaqaale ayaa ku soo saa'iday kooxdeenna - *Two staff members are new to our team.* Saa'idis (n). SMA: korodh ( *conj.1*).

**Saa'idi** ( *trans.- conj. 2a*) To increase something. Shirkaddu way kordhin doontaa sicirka shidaalka— *The company will increase the price of fuel.* Saa'idin ( n). SMA: kordhi ( *conj. 2a*).

**Saamax** ( *trans.- conj. 1*) To forgive. Miyaad saamaxaysaa Gurey?— *Will you forgive Gurey?* 2. Permitting—used in the phrase **Haddii hawadu saamaxdo**— *Weather permitting.* Saamixis (n).

**Saaxiib** ( *trans.- conj. 1*) To become a friend with – used with *la*. Geelle waxaan la saxiibay sanadkii hore— *I became a friend of Geelle last year.* Saaxiibis (n). SMA: la rafiiq ( *conj. 1 arb.*).

**Sababee** ( *trans.- conj. 2b*) To justify. Miyuu sababeeyay maqnaanshihiisii?— *Has he justified his absence?* Sababayn (n).

**Sadaqee** (*trans. -conj. 2b*) To give away something as a charity. Miyaad sadaqaysaa dhar badan? — *Do you give away many clothes for charity?* Sadaqayn (n).

**Safo** (*intr.- conj. 3b*) To line up; to queue. Ardaydu way saftaan subax kasta intaysan gelin fasallada - *Pupils line up every morning before going to classes.* Safasho (n).

**Sahlo** ( *trans.- conj. 3a*) To underestimate. Ha sahlaniin howsha—*Don't underestimate the task.* Sahlasho (n). SMA: yarayso ( *conj. 3b*).

**Salaan** (*trans.- conj.1*) To greet. Faarax baan salaamay- *I have greeted Faarax.* Way isa salaamayaan - *They are greeting each other.* Salaan (n).

**Sallim** ( *trans.-conj. 1* ) To surrender—used with *isa*. Tuuggu wuu isa sallimay— The thief the surrendered. SMA: isdhiib ( *conj. 1* ) 2. To give someone something; to hand in something –used with *ku*. Lacagtii Qadra ayaan ku sallimay— *I have given the money to Qadra*. Isa/ku sallimis (n).

**Samir** (*intr.- conj. 1* ) To be patient. (*Used with u (with)*): Waan u samray walaalkay markuu si kulul ii la hadlay - *I was patient with my brother when he spoke to me harshly*. Variant spellings: sabbur *and* sabir. Samirka(n)= patience. SMA: dulqaado (*conj. 3b*).

**Sarrif** ( *trans.- conj. 1* ) To give a change. Miyaad ii sarrifi kartaa toban gini adigoo mahadsan?— *Could you exchange ten pounds for me, please ?* Sarrifis (n).

**Sawir** (*trans.- conj. 1 arb. )* To draw. Sawir libaax ku fadhiya kursi! - *Draw a lion sitting on a chair!* Sawiris (n). Sawirka ( a picture/drawing).

**Sax** ( *trans.- conj. 1* ) To mark an examination paper. Imtixaanka waa la saxay— *The examination has been marked*. 2. To correct someone or something. Waad i sixi kartaa haddii aan gefo— *You can correct me if I make a mistake*. Sixis (n).

**Saxiix** ( *trans.- conj. 1* ) To sign something. Waan saxiixi doonaa heshiiska— *I will sign the agreement*. Saxiixis (n). Saxiixa (n)= the signature.

**Shaah** (*intr.- conj. 1* ) To have tea. Na keen aynu shaahno!—*Let us go and have tea*. Shaahis (n).

**Shabbah** ( *trans.- conj. 1* ) To look like. Wuxuu shabbahaa aabbihiis— *He looks like his father*. Used with *is* (each other). Wiilka iyo aabbiis way is shabbahaan— *The boy and his father look like each other*. Shabbihis (n).

**Shahiid** ( *intr.- conj. 1* ) To become a martyr. Muu shahiidin— *He has not become a martyr*. Shahiidis (n). Shahiidka (n): a martyr.

**Shaki** (*intr.- conj. 2* ) To be suspicious of something—used in past tense but can convey either simple present or simple past in English ; *used with ka (of)*: Waan ka shakiyay ninka sheegtay inuu yahay farsamo-yaqaan - *I was/am suspicious of the man who claimed to be a technician*. Shakin (n).

**Sharayso** (*trans.- conj. 3b. arb*) To be superstitiously pessimistic about something. Maan sharaysto socdaalka Jimcaha - *I am not superstitiously pessimistic about travelling on Fridays*. Sharaysasho (n). SMA: belayso (*conj. 3b arb.*) and baasayso (*conj. 3b arb.*).

**Sharciyee** (*trans.- conj. 2b arb.*) To legalise; to render something legal (e.g. ownership). Waxaan sharciyeeyay gurigayga - *I have made ownership of my house legal*. Sharciyayn (n).

**Sharrax** (*trans.- conj. 1* ) 1. To decorate something. Guriga waa inaan sharxo ka hor sanadka cusub - *I have to decorate the house before the New Year*. Guriga cusub salliyo xardhan baa lagu sharxi doonaa - *The new house will be decorated with patterned mats*. 2. *Used with u (to)*: To explain. Wuu ii sharrixi doonaa casharka – *He will explain the lesson to me*. 3. To put one's name forward for an electoral contest. (*Used with isa (self) and used with optional soo*): Samatar baa isa soo sharraxay - *Samatar has put forward his candidacy*. Sharraxis (n).

**Shiddee** (*trans.-conj. 2b*) To trouble. Yaa ku shiddeeyay?—*Who has troubled you?* Shiddayn (n). SMA: dhib ( *conj. 1*) and caddib/cadib ( *conj. 1 arb.*).

**Shifayso** ( *trans.- conj. 3b*) To have confidence in something. Waan shifaystay sadka la i siiyay— *I have confidence in the share given to me.* Shifaysasho (n).

**Shuraakow** (*trans.-conj. 1*) To share a business with someone (the person is the direct object). Sabriye wuxuu la shuraakoobay Looyaan— *Sabriye shares a business with Looyaan.* Shuraakoobis (n).

**Shuuf** (*trans.- conj. 1*) To look at; to learn more about one's behaviour ( used sarcastically and implies criticism). Waan shuufay Geelle— *I have learned more about the ways of Geelle.* Shuufis (n).

**Sifee** ( *trans.- conj. 2b*) 1. To clean. Miyaad sifaysay digsiga?— Have you cleaned the pot? 2. To describe. Waxaa ninka lagu sifeeyay qof deeqsi ah — *The man has been described as a generous person.* SMA: ku tilmaan. Sifayn (n).

**Silsiladee** ( *trans.- conj. 2b*) To tie up someone with chains, Tuugga waa la silsiladeeyay markii loo sii waday maxkamadda— *The thief was tied up with chains while being taken to the court.* Silsiladayn (n).

**Sinayso** (*intr.- conj. 3b*) To commit sin. Muu sinaysanin— *He has not committed a sin.* Sinaysasho (n). SMA: danbow/dambow ( *conj. 1 arb.*).

**Sixir** (*trans.- conj. 1*) To bewitch someone by using sorcery. Miyaa la sixray ninka?—*Has the man been bewitched?* Sixrid (n). Sixirka (n): Sorcery. SMA: fal (*conj. 1*).

**Siyaaro** ( *trans.- conj. 3b*) To visit. Ma walaalkaa baa berri ku soo siyaaran doona?— *Will your brother visit you tomorrow?* Siyaarasho (n). SMA: booqo (*conj. 3b*).

**Soon** ( *intr.- conj. 1*) To fast during the month of Ramadan. Miyaad soontaa?—*Do you fast?* 2. To avoid eating food— used with ka: Maxbuusku cuntada ayuu ka soomay— *The prisoner has fasted (in protest)* . Soonka(n)

**Sujuud** ( *trans.- conj. 1*) To bow down in worship; to prostrate. Waan sujuudaa marka aan tukanayo. *I prostrate when I am praying.* Sujuudis (n).

**Sumee** ( *trans.- conj 2b*) To poison. Jiirka ayuu sumayn doonaa — *He will poison the rat.* Sumayn (n).

**Suul** ( *trans.- conj. 1*) To disappear . Deeqsinimadu may suulin— *Generosity has not disappeared.* Suulis (n).

**Suuree** (*trans.- conj. 2b*) To give a picture of or description of something. Miyaad suurayn kartaa wajiga qofka furaha kaa qaaday?— *Can you describe the face of the person who took the key from you?* Suurayn (n).

**Taajir.** ( *intr.- conj. 1*) To become rich. Wuu taajirayaa haddii uu soo dejiyo baabuur— *He will become rich if he imported cars.* 2. To make money— used with ka. Waxay ka taajirtay dhoofinta xoolaha—*She has made money from exporting livestock.* SMA: ka lacagayso (*conj. 3b*). Taajiris (n). Taajirka(masc.)/taajiradda (fem.)= a rich person). SMA: lacagayso (*conj. 3b*).

**Taariikhee** (*trans.- conj. 2b*) To give or set a date for something. Miyaad taariikhaysay maalinta kulanka?— *Have you set a date for the day of the*

*meeting?* 2. To tell a story— used with *ka*. Wuxuu ka taariikhayn doonaa safarkiisii badda— *He will tell story about his voyage on the sea*. Taariikhayn (n).

**Tabarruc** ( *trans.- conj. 1* ) To donate something—used with *ku*. Nin ganacsade ah ayaa lacag ugu tabarruci doona dugsi— *A businessman will donate money to the school*. Tabarruca (n).SMA: Ku deeq ( *conj. 1* ).

**Tacab** (*trans.- conj. 1* ) To work on one's own farm/to farm one's own land. Sisin buu xilligan tacbayaa - *He is growing sesame this season*. Tacbis (n) Tacabka (n): the produce.

**Tacaddi** ( *tran.- conj. 2a* ) To mistreat someone—used with *ku*. Miyaad ku tacaddisay saaxiibkaa?— *Have you mistreated your friend?* Tacaddin (n). SMA: xumee ( *conj. 2b* ).

**Tacsiyadee** (*trans.- conj. 2b* ) To offer condolences. (*Used with u*): Wuu u tacsiyadeeyay qoyska - *He has offered condolences to the family*. Tacsiyadayn (n).

**Tafsiir** (*trans.- conj. 1* ) (Of the Qur'an) to explain the meaning of the scripture. Sheekh Quraanka ayuu galab kasta tafsiiaraa - *The Sheikh explains the meaning of the Qur'an every afternoon*. Tafsiiirka (n).

**Tahniyadee** (*trans.- conj. 2b* ) To congratulate someone. (*Used with u*): Waxaan u tahniyadaynayaa saxiibkay oo gudbay imtixaan - *I am congratulating my friend who passed an examination*. Tahniyadayn (n). SMA: hambalyee ( *conj. 2b* ).

**Tahriib** (*intr.- conj. 1* ) To enter a foreign country illegally. (*Used with u (to)*): Soomaali badan baa Yemen u tahriibtay - *Many Somalis have entered Yemen illegally*. Tahriibis (n).

**Takhallus** (*trans.-conj. 1*) To get rid of; to eliminate— used with *ka*. Aniga ayaa ka takhalusi doona qashinka guriga yaalla — *I will get rid of the rubbish in the house*. Takhalusid (n).

**Takhasus** (*trans.- conj. 1* ) To specialise in a subject. Maxaad ku takhasusi doontaa?— *What will you specialise in?* Variant spelling: taqasus.Takhasusid (n).

**Tanaasul** (*intr. conj. 1*) To make a compromise. Mid ka mid ah labada nin baa tanaasuli doona— *One of the two men will make a compromise*. Used with *u* ( for ) and *ka* ( on ). Tanaasulid (n).

**Tarbiyadee** (*trans.- conj. 2b*) To bring up a child properly. Hooyadu waa inay ubadkeeda u tarbiyadayso si wanaagsan –*The mother should bring up her children in a good manner*. Tarbiyadayn. (n). SMA: ababi, barbaari and kori ( *conj. 2a* ).

**Tarjum** (*trans.- conj. 1*): To translate. Yaa tarjumi doona buuggan?—*Who will translate this book?* (*Used with u* (into) and *ka* soo (from): Buuggan waxaa loo tarjumay af Soomaali—*This book has been translated into Somali*. Variant spelling: turjum. Tarjumis (n). SMA: rog and beddel ( *both conj.1 and used with u* ).

**Tartiibi** ( *trans.- conj. 2a* ) To deal with someone calmly—used with *u*. U tartiibi walaalkaa marka aad waaninaysid— *Deal with your brother calmly when advising him*. Tartiibin (n).

**Tartiibso** ( *intr.- conj. 3a* ) To calm down—used imperatively. Tartiibso!— *Calm down !* Tartiibsasho (n). SMA: isdeji ( *conj. 2a* ).

**Tasarruf** ( *trans.- conj. 1* ) To have an authority to use power or manage something ( may imply power misuse). Wasiirka ayaa ku tasarrufa misaaniyadda horumarinta— *The Minister has the authority to manage the development budget.* Tasarrufis ( n).

**Towbad-keen** ( *intr.- conj. 1; p.s.* ) To repent. Miyuu towbad-keenay?—*Has he repented?* Variant spelling: toobad-keen. Miyuu ka towbad-keenay tuuganimadiisa?— *Has he repented of his theft?* Towbad-keenis ( n).

**Tuhun** ( *trans.- conj. 1* ) To become a suspect ( the person is the object of the sentence)—and is used in past tense to convey simple present tense in English . Waa la tuhmay ninka— *The man is a suspect.* Used with *ku* ( of): Waxaa lagu tuhmay inaad kaalin ku leedahay dagaalka— You are suspected of having a role in the fight. Tuhmis (n).

**Waafaji** ( *trans.- conj. 2a* ) To make something in agreement with something else. Miyaa qodobka cusub la waafajiyay qodobka kowaad mise wuu burinayaa?— *Has the new article been made in agreement with the first article or is it contradicting it (the article) ?* Waafajin (n).

**Waafaq** ( *intr.- conj. 1* ) To correspond with; to be in accordance with . Soo jeedintaadu way waafaqaysaa heshiiskii hore— *Your suggestion is in accordance with the earlier agreement.* 2. Used with *ku* : to agree with. Waan ku waafaqay Sahra inay hirgeliso mashruuca cusub— *I have agreed with Sahra to implement the new project.* SMA: ku raac ( *conj. 1* ). Waafiqis (n).

**Waasici** ( *trans.- conj. 2a* ) To widen/make something wider. Waasici qolka! - *Make the room wider.* Waasicin (n). SMA: ballaari/ballaadhi ( *conj. 2a* ).

**Wacdi** ( *trans.- conj. 2a* ) To preach to people. Dadka ayuu Shiikhu wacdiyaa— *The Sheikh preaches to people.* Wacdin (n).

**Wacyi-geli** ( *trans.- conj. 2a; p.s.* ) To raise one's awareness— used *ku* ( 'about' , for something positive) and *ka* ( 'against', for something negative). Waa inay shaqaalaha caafimaadku ku wacyigeliyaan waalidka waxtarka naasnuujinta— *Health workers should raise parents' awareness about the importance of breastfeeding.* Wacyigelin (n). SMA: ku/ka baraaruji ( *conj. 2a* ).

**Wajah** ( *trans.- conj. 1* ) To face something ( e.g. a problem )— in Somali a problem faces the person. Dhibaato ayaa i soo wajahday—*I have faced/am facing a problem.* 2. To confront someone. Waan wajahayaa Jimcaale – *I will confront Jimcaale.* SMA: u bareer/badheedh ( *conj. 1* ). Wajihis (n).

**Waji-dhaqo** ( *intr.- conj. 3b; p.s.* ). To wash one's face. Waan waji-dhaqdaa aroor walba— *I wash my face every morning.* Waji-dhaqasho (n).

**Wakiilo** ( *trans.- conj. 3b* ) To ask someone to act on your behalf or to represent you. Ganacsaduhu wuxuu wakiishay qareen— *The businessman has asked a lawyer to represent him.* Wakiilasho (n).

**Wasakhee** ( *trans.- conj. 2b* ) To make something dirty. Yaa wasakheeyay xafiiska?— *Who has made the office dirty?* Variant spelling: wasaqee. Wasakhayn (n).

**Xaadir** ( *intr. Conj. 1*) To be present— used with *soo*( *when in simple present tense it implies habitual action rather than present tense*; use the verb *joog* to convey simple present tense meaning). Sureer way soo xaadirtay shalay— *Sureer was present yesterday*. Xaadiris (n).

**Xaadiri** ( *trans.- conj. 2a*) To check the attendance of pupils or staff by calling out their names. Macallinku wuu xaadirinayaa ardayda— *The teacher is checking pupils' attendance*. Xaadirin (n).

**Xaajootan** ( *trans.- conj. 1*) To have a discussion with someone. Miyaad la xaajootamaysaa Seeraar?— *Are you going to have a discussion with Seeraar?*

Xaajootanka(n). SMA: xaajoo ( *conj. 3a*).

**Xaaraamee** ( *trans. conj. 2b*) To judge something to be illegal according to Islamic law. Cabista dhiigga waa la xaaraameeyay—*Drinking blood is/has been judged to be illegal according to Islamic law*. Xaaraamayn (n).

**Xabbis** ( *trans.- conj. 1*) To put someone in jail. Tuugga waa la xabbisay— *The thief has been put in jail*. Xabbisid (n). SMA: xir/xidh ( *conj. 1*).

**Xaddid** ( *trans.- conj. 1*) To limit. Waan xaddidayaa waqtiga qof walba hadli doono— *I will make a limit for the time for every speaker*. Xaddidis (n).

**Xadgudub** ( *tran.- conj. 1; p.s.*) To violate something—used with *ku*. Ha ku xadgudbin sharciga waddooyinka! - *Don't violate the road laws!* Xadgudbis (n) . SMA: jabi ( *conj. 2a*).

**Xafid** ( *trans.- conj. 1*) 1. To learn something by heart; to memorise. Miyaad xafidi kartaa gabay?— *Can you learn a poem by heart?* Variant spelling: xifdi. SMA: qayb ( *conj. 1*). 2. To put something in a safe place. Miyaad ii xafidday furahayga?— *Have you put my key in a safe place ?* Xafidis (n).

**Xafladee** ( *intr.- conj. 2b*) To party; to be in festive mood. Way xafladayn doonaan imtixaanka ka dib— *They will party after the examination*. Xafladayn (n). SMA: damaashaad ( *conj. 1*).

**Xaji** ( *intr.- conj. 2a*) To go to the Hajj for pilgrimage. Wuu xajin doonaa sanadka dambe— *He will go to the Hajj next year*. Xajin (n). Xajka( the Hajj).

**Xalaalee** ( *trans.- conj. 2b*) To judge something to be legal according to the Islamic law. Cunista kalluunka waa la xalaaleeyay— *Eating fish is judged to be legal according to Islamic law*. Xalaalayn (n).

**Xalli** ( *trans.- conj. 2a*) To solve a problem. Miyaad xallin kartaa dhibaataada?— *Can you solve the problem?* Xallin (n). SMA: dhammee ( *conj. 2b*).

**Xamaal** ( *trans.- conj. 1*) To carry something on the back. Kiish sonkor ah waan xamaali karaa— *I can carry a sack of sugar on my back*. Xamaalis (n).

**Xamaalo** ( *intr.- conj 3b*) To work hard to earn a livelihood. Wuu xamaashaa – *He works hard to earn livelihood* . Xamaalasho (n).

**Xamdi** ( *trans.- conj. 2a*) To be grateful to God—used with *u(to)/ku*( for). Eebbe ayaan u xamdinayaa— *I am grateful to God*. Xamdin (n). SMA u xamdi-naq/noq ( *conj. 1; p.s.*) and ku shurki ( *conj. 2a arb*).

**Xannaanee** ( *trans.- conj. 2b*) To look after. Way xannaanaysaa carruurta walaalkeed— *She looks after her brother's children*. Xannaanayn (n).

**Xaqdhowr** ( *trans.- conj. 1; p.s.*) To respect rights of someone or status of someone ( e.g. an elder) . Waa inaannu xaqdhowro waalidka— *We must respect parents*. Xaqdhowris (n).



**Xaqiiji** ( *trans.- conj. 1* ) To confirm. Miyaad xaqiijin kartaa in Faarax imanayo berri?— *Could confirm that Farah is arriving tomorrow?* Xaqiijin (n). SMA: hubi (conj. 2a).

**Xaqsoor** ( *intr.- conj. 1; p.s.* ) To judge fairly. Garsooruhu wuu xaqsoori doonaa— *The judge will adjudicate (the case) fairly.* Xaqsooris (n). SMA: cadli-fal ( conj. 1 ).

**Xarakee** ( *trans.- conj. 2b* ) To dribble a ball. Si fiican buu u xarakayn karaa kubadda — *He can dribble the ball nicely.* Xarakayn (n).

**Xarbi**( *trans.- conj. 2a* ) To fight. Waan la xarbiyay tuugga shalayto— *I fought the thief yesterday.* Xarbin (n). SMA: La dagaal ( conj. 1 ).

**Xasili** ( *trans.- conj. 1* ) To stabilise, Ciidanka dowladda ayaa xasilin doona magaalada—*The government troops will stabilise the town.* Xasilin (n). SMA: deji ( conj. 2a ).

**Xawil** ( *trans.- conj. 1* ) To send money through a remittance agency. Lacag buu walaalkiis u xawilaa bil kasta—*He sends money to his brother every month.* Xawilis (n).

**Xikaayoo** ( *intr.- conj. 3a* ) To tell a story. Wuxuu ka xikaayoon doonaa noloshisii xabsiga— *He will tell a story about his past life in jail.* Xikaayoodka(n). SMA: sheekee ( conj. 2b ) and qisee ( conj. 2b arb. ).

**Xisaab** ( *trans.- conj. 1* ) (Of money or objects) to count. Miyaad xisaabinaysaa tirada qalimada aad iibisay?— *Are you counting the number of pens you have sold?*

Xisaabin (n). 2. To hold someone accountable (does not imply wrong-doing).

Macallin kasta waa la xisaabayaa— *Every teacher will be held accountable ( i.e he/she will have a performance review).* SMA: tiri ( conj. 2a ).

**Xisaabtan** ( *trans.- conj. 1* ) To hold someone accountable . Maamulayaasha waa lala xisaabtamayaa— *Managers will be held accountable.* Xisaabtamid (n).

**Xoree** ( *trans.- conj. 2b* ) To liberate. Xoogagga Isbahaysiga ayaa xoreeyay Faransiiska— *Allied forces liberated France.* Variant spelling: xuree. Xorayn (n).

**Xorow** ( *intr.- conj. 1* ) ( Of a country ) to attain independence . Soomaaliya waxay xorowday 1960kii—*Somalia attained independence in 1960.* Variant spelling: xurow. Xoroobis (n).

**Xukun** ( *trans.- conj. 1* ) To sentence someone. Tuugga waxaa lagu xukumay hal sano oo xadhig ah—*The thief has been sentenced to one year jail.* 2. To rule. Xisbigu wuxuu xukumayay dalka afar bilood— *The party has been ruling the country for four months.* Xukumis (n).